



## Xaashida farsamada



### 9. SUUQA SAAMIYADA BARASHADAYDA LUUQADAHА

Cinwaanka Hawsha	Suuqa Saamiyada Barashadayda Luuqadaha
L2L cabbirada	<p><b>Is-wacyigelinta</b></p> <ul style="list-style-type: none"><li>- Maxaan samayn karaa?</li><li>- Maxaan u baahanahay si aan u roonaado?</li></ul> <p><b>Hindisaha &amp; Lahaanshaha</b></p> <ul style="list-style-type: none"><li>- Fahamka xadidnaanta waxbarashada &amp; suurtogalmnimada</li><li>- Xil iska saarista mas'uuliyada waxbarashadayda</li></ul> <p><b>Hawligelinta &amp; Maamulista</b></p> <ul style="list-style-type: none"><li>- Fahamka xeeladaha waxbarashadayda iyo sida ay u saameeyaan waxbarashadayda</li><li>- Eeg horumarkayga</li></ul> <p><b>Kormeerka &amp; La qabsiga</b></p> <ul style="list-style-type: none"><li>- Sidee buu qaakaygu u bedelay wixii aan sameeyay?</li><li>- La qabsiga waxa aan qabto ee waxbarashadayda mustaqbalka</li></ul>
Soo koobida hawsha	Hawshani waxay kaa caawin doontaa inaad hubiso horumarkaaga oo aad qiimeyso sida waxbarashadaadu ula xidhiidho hawlaha aad qabato iyo sida ay tani u saamaynayo dhiirigelintaada.






## Qalabka hawsha

Toddobaadkiiba hal mar, qaado wakhti aad ku qorto waxaad baratay. Sawir garaaf, sida kan hoose oo kale, oo dhig dhibco yar meesha aad u malaynayso tamartaada, dhiirigelintaada, iyo waxbarashadu waxay ahaayeen miisaan 0 ilaa 10 ah (0=ugu xun 10=Ugu fiican) U isticmaal midab ka duwan qayb kasta. (Hoos ka eeg tusaale) Xagga hoose ee shaxda, ku dar noocyada hawlaha aad dooratay inaad samayo. Waxaa laga yaabaa inuu diiradda saarayo akhriska, u soo bandhigida nuxurka koox asxaabtaada ah, ama qorista warqad rasmi ah. Sawir xariiq si aad u muujiso wakhtiga aad diyaarisay, baratay oo aad fulisay hawlahan.

Dhammaadka muddada aad naftaada u dejisay, ku xidh dhibcaha oo buuxi su'aalaha qiimaynta ee hoose. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad qiimeyso sida waxbarashadaadu ula xidhiidho hawlaha aad qabato, iyo sida ay tani u saamaynayso dhiirigelintaada.





**Qiimaynta/Milicsiga:**

1. Waa nooceee hawlaha waxbarasho ee aad samaynaysay?
2. Maxaa ku dhacaya qalooca waxbarashadaada, marka la barbar dhigo:
  - a. Nooca tartanka waxbarasho
  - b. Heerka dhiirigalinta
  - c. Heerka tamarta
3. Goormaad si fiican wax u barataa, goormaadse kugu adkaataa? Fahamka qalooca waxbarashadaada waxay kaa caawin kartaa inaad hagaajiso xeeladaha aad isticmaasho. Maxaa ku dhacaya heerarka tamartaada iyo dhiirigelintaada marka qalooca waxbarashadu kor/hoos u kaco?
  - a. Maxaad u baahantahay inaad badiso samayntiisa?
  - b. Waa maxay nooca xeeladaha waxbarasho ee aad isticmaashay iyo waxa dhacay markaad samaysay?
  - c. Maxaad u baahantahay inaad baddesho ama hagaajiso?
4. Waa maxay cawaaqibta ama natiijooyinka ilaa hadda si aad u gaarto hadafkaaga / ujeedooyinka waxbarasho?

